

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

ولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 3^{aad}

Garoowe, 27/6/2001

Lam. 6

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba. Rukunka Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gadihiisa, dibaddana waa Sh.So.500.000-Rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

SHarci

Waxba Ma leh.

Qaybta Labaad

Xeer

Qaybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Wax ka bedel, Axdiga p/Land

Waxba ma leh.



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Xeer Lam 2

27/6/2001

Kuna saabsan wax ka bedelidda Golaha Wakiillada wax ka bedelay qodobo ka mid ah Axdiga Dawladda Puntland,

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEEY Ansixinta wax ka bedelka Golaha Wakiillada ku sameeyey qodobada Axdiga ee 8.4, 12.1 iyo 28.4, iyadoo Goluhu waafajiyey sida uu qabo ama qeexayo qodobka 35.1 ee Axdiga Dawlad Goboleedka Puntland, sida ku cad warqadda ansixinta wax ka bedelidaas ee summadeedu tahay GW/64/DGPS/2001 ee 27/06/2001,

WUXUU SOO SAARAY:

Xeerka wax ka bedelidda ee soo socda:

Qodobka 1^{aad}


Wax ka bedelidan Axdiga Puntland 2001^{da} ee Dawladda Puntland waa la ansixiyey.

Qodobka 2^{aad}

Seddex nuqul oo wax ka bedelidan Axdiga Puntland ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa Asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxweynaha hal nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul iyo Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul.

Qodobka 3^{aad}

Xeerkan wax ka bedelidda Axdiga Puntland wuxuu dhaqan gelayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo, ka dibna waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Puntland, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro wax ka bedelka Axdiga kuna dhaqmo.


Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda



بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIY
Golaha Wakiillada



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
Representative Council

Ref. GWDGPS.65. 2001

Date, 27/06/2001

Golaha Wakiillada.

Markuu arkay, Qodobka 8.1 ee axdiga ee siinaya awoodda xeer-dejinta Dalka.

Markuu arkay, Qodobka 35.1 ee Axdiga oo siinaya awoodda wax ka bedelidda Axdiga

Wuxuu beddeley Qodobada soo socda:-

1. Qodobka 28.4 wuxuu u bedelmay sidan:-

B) Axdiga waxaa bedelayaa dastuurka cusub ee Golaha wakiilladu ansixiyeen 9/06/2001, wuxuuna dhaqan gelayaa 01/07/2001.

T) Dastuurka waxaa loogu dhaqmayaa si ku meel gaar ah inta afii Dadweyne loo qadayo.

J) Waqtiga Dastuurka afii Dadweyne loo qadayo waxaa ka go'aan qaadanaya Golaha wakiillada.

2. Qodobka 8.4. wuxuu u bedelmay sida soo socota:-

"Muddada xilka Golaha wakiillad waxaa la dheereeyey Saddex Sano oo ka bilaabata 01/07/2001 iyadoo markii hore ku ekeyd 30/06/2001 wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadaha uu dastuurku siinayo"

3. Qodobka 12.1 wuxuu u bedelmay sida soo socota:-

"Mudada xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne K/xigeenka waxaa la dheereeyey 3 Sano oo ka bilaabata 01/07/2001 iyadoo markii hore ku ekeyd 30/06/2001 waxayna yeelanayaan awoodaha iyo waajibaadaha uu Dastuurku siinayo"

Yuusuf X. Saciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada

